Xeerka NWHMC –
Adeegyada Dhaqaalaha
Bukaanka
Xeerka Biilka iyo Ururinta NWH

I. XEEERKA

Shaqada Northwest Hospital & Medical Center (NWHMC) waa inay soo bandhigto farshaxanka iyo tayada adeegyada daryeelka caafimaad ee ay siinayso Bulshada daggan Waqooyiga Seattle. Si shaqadani u suurtogasho isbitaalku waxa uu u baahan yahay in uu dhaqan galiyo xeer ururin oo:

A. Lagu dhiirigalinayo in kharashka adeegyada la qabtay wakhtigiisa lagu bixiyo.

B. Ka jawaabaysa xaaladda dhaqaale ee bukaan kasta.

C. Bixisa ikhtiyaaro damacsan oo hufan oo ka jawaabaya bukaanada waajibaadkooda dhaqaale.

Xeerkani waxa uu hagi doonaa shaqaalaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka (PFS) markay la shaqaynayaan bukaanada. Agaasimaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ama Agaasimaha Hawlgallada Dhaqaalaha ayaa fududaynaya ama go'aan ka gaadhaya xaaladaha aanu xeerku qeexin.

Xeerkan gudihiisa kalmadda 'Bukaan' waxaa loo adeegsan doonaa bukaanka laftiisa ama ciddii kale ee sharciyan ka masuulka ah bixinta kharashka.

II. GUUDMARKA XEERKA

Waa xeerka NWHMC oo dhigaya in la bixiyo kharashka dhammayska tiran ee adeegyada la qabtay. Bixin kharashka dhammayska tiran ayaa looga fadhiyaa bukaanka marka uu soo gaadho qaansheegta ka bixidda inta aanu caymisku bixinaynin haddii aan heshiis la isla gaadhin Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka.

A. Ikhtiyaarada in La Gudo Daynta

Waxaa jira 8 ikhtiyaar oo lagu gudi karo daynta:

IKHTIYAARADA	**TIXRAACA XEERKA**
Dib u Celinta Kharashka	Xeerka Kharashka
Wax Ka Baddalka Heshiiska	Heshiiska Caymiska
Samafalka	Xeerka Caawimada Maaliyadeed
Isbaddalka Maamulka/Waxkale	Xeeka Wax-ka-baddalka
Bixinta Lacagta Caymiska	Xeerka Ururinta
Lacag-bixinta Bukaanka	Xeerka Ururinta
Amaah Xumo - Cidii Aan Hay'ad Ahayn/Waxkale	Xeerka Ururinta
Amaah Xumo – Hay'adda Qaadidda	Xeerka Ururinta

B. Baadhista Dhaqaalaha Bukaanka:

Bukaanada waxaa baadhis lagu samayn doonaa si loo ogaado masuuliyadda kharash ee uu qaadi karo kahor intaanu gelin ama marka uu galayo/iska diwaangalinayo isbitaalka, balse, bukaanada lagu arko xaalad caafimaad oo degdeg ah waa la dawayn doonaa waxaana loo samayn doonaa kaalmo caafimaad kahor intaan dhaqaalihiisa la eegin. Waxaa looga fadhiyaa in bukaanadu uu bixiyo xog dhab ah oo dhammaystiran taas oo shaqaaluhu ka dheehan doonaan awoodda bixinta kharashka ee bukaanka. Marka la ogaado waxa uu bukaanku qaadi karo, shaqaaluhu waxay bukaanka sida ugu dhakhsaha badan ula socodsiin doonaan bukaanka.

Baarista dhaqaalaha waxaa kamid ah qaar ama dhammaan kuwa soo socda:

1. Ururinta xogta dimugaraafiga dhaqaalaha.
2. Ogaanshaha u-qalmidda caymiska iyo dheefaha.
3. In la buuxiyo Foomka Xogta Dhaqaalaha ee Qarsoodiga ah.
4. Helidda lambarrada iyo gudbinaha ansixinta caymiska.
5. Samaynta qorshe uu bukaanku ku gudayo wixii lagu lahaa.
6. Qaadidda deebaajiyada ku salaysan dhidhaktibaliska iyo xaddiga caymis wadareedka sida uu dhigayo qorshaha caymiska bukaanku.
7. In dib u eegid lagu sameeyo taariikhdii hore ee kharash bixinta bukaanka ee NWHMC.

C. Qaadidda Deebaajiga:

Iyada oo laga shidaal qaadanayo dib u eegidda dhaqaalaha iyo qiyaasta baaqi iska-bixinta, waa xeerka NWHMC codsashada deebaajiga iyo baaqiga qiyaasta caymis wadareedka isla marka la isla garto xaddiga ama sida uu dhigayo caymiska bukaanku. Xisaabaha waxa loo furi doonaa bukaanada si uu ugu sii shubo kharashka daryeelkiisa. Kharashka sidoo waxaa la qaadi karaa muddada daryeelku socdo ama laga baxayo isbitaalka. Qolka Gurmadka Degdeg ah, lacagta waxaa la bixinayaa kadib marka adeegyada caafimaadka la bixiyay oo kaliya ee bukaanku ka soo reeyo. Dhammaan kharashka waxaa loo qaadaa taxadir, oo waafaqsan dhammaan xeerarka isbitaaladu.

Adeegyada qurxinta ama wixii aad daruuri caafimaad ahayn waxaa khasab ah in marka hore la sii wada bixiyo. Xaalado gaar ah in la wada bixiyo kharashka marka hore waxay yeelan kartaa wax ka reeban laakiin waa in uu ansixiyo Maamulka Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanku/Helitaanka Bukaanka.

D. Qaabdhismeedka Guud ee Ururinta:

Dhammaan kharashka taagan waxaa la bixinyaa marka la helo qaansheegta ka bixidda isbitaalka marka laga reebo kuwa soo socda ee qofku bixinayo:

1. Heshiisyo Qorshaha Lacag-bixinta, oo waafaqsan xeerkan, ayaa la sameeyay.
2. Baadhitaan danbe oo dhaqaalaha ah ayaa la sameeyay.
3. Khalad dallacaadda biilka isbitaalka ah, dib u dhacyo, ama muran qaansheeg ah oo wali taagan.
4. Baaqiqa ku hadhsan bukaanka oo la sheegi kari waayay maadaama oo ay jirto kharash caymiska laga dalbaday oo aan la bixin.

E. Xeerka Kharashka Lagu Dallacayo Caymiska:

Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ee NWHMC waxa uu kharashka ku dallici doonaa gobolka, fadaralka iyo heshiiska caymiska. Ilaha kale ee dhaqaale waxa lagu dallici doonaa kharashka marka uu bukaanku keeno xogta daruuriga ah.

F. Baaqiga Bukaanka:

Kharashka waxa uu bukaanku bixinayaa marka ay soo gaadho qaansheegta ka bixidda isbitaalka, haddii ayna jirin heshiis kale oo lala galay Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka. Bukaanka uma qabsanayno wax kharash ah ilaa aanu caymiska kala baxno, taas oo ay kamid tahay diidmada rafcaanada laga qaatay. Waxaanu u dhaqanaa u ololeeyaha bukaanka si aanu ugu helno kharashka caymiska intaan loogu baddalin mid uu isagu bixinayo qof ahaan; balse anagu masuuliyaddeeda ma qaadayno dalabka bukaanka ama wixii laga heshiiyo in khasaare-sooran loo qaybsado.

Arrimaha tayada daryeelka iyo saxsanaanta qaansheegaha waa in sida ugu dhakhsaha badan loo saxaa kahor intaan la guda galin qaadidda daymaha.

Dhammaan bukaanada sheegta dhaqaale xumo waxaa dib u eegid lagu samayn doonaa inay heli karaan Kaalmo Dhaqaale iyo/ama Medicaid. Waxaa la bixin karaa Kaalmada Dhaqaale wakhti kasta, xataa marka la diro hay'adda kharash qaadidda.

III. IKHTIYAARADA BIXINTA BAAQIGA EE BUKAANKA U DIYAARKA AH

A. Qaababka Bixinta Lacagta:

NWHMC way qaadataa kaash, jeeg ama gaadhadhka Visa/MasterCard. Ku bixinta kiridhit kaadh waa la oggol yahay wixii taleefanka ah ama bixinta biilka onlaynka ah. Qaybta bukaanka kusoo hagaagaysa waa in lagu dallacaa marka ugu horreysa ee ka bixidda isbitaalka haddii ayna jirin heshiis lacag-bixin ama aan la gudbin arjiga Kaalmada Dhaqaalaha.

B. Qorshayaasha Bixinta Lacagta:

Heshiisyada bixinta kharashka waxaa lagu sameeyay codsi bukaanka ka yimi ee Waaxda Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka ah. Tani waxay dhigaysaa in bukaanku uu 12 bilood uu ku bixin karo xaddi lacageed oo isku mid ah, way ka sii badan kartaa haddii loo ansixiyo oo ay duruufo jiraan.

1. Ansixinta Foomka Dhaqaalaha ee Qarsoodiga ah (CFF) waxaa ka horreeya heshiis lacag-bixin kaas oo 12 bilood kabadan.

C. U Gudbinaha Hay'dda Ururinta Kharashka:

U gudbinaha Hay'adda Ururinta waxa ay ku munaasab tahay marka bukaanka aanu doonaynin in uu u hoggaansamo heshiiska kharashka, uu ka baxo heshiiskii kharash bixinta, aanu u soo gudbin cagaha caymiska xagga isbitaalka, ama uu leeyahay taariikh xun xagga lacag-bixinta ee NWHMC (Shuruudaha Gudbinaha Bixinta Lacagta). Xisaabaha bukaanka waxaa lagu wareejin doonaa hay'adda qaadidda kharashka marka uu dib u eegid ku sameeyo Horjoogaha Adeegga Macmiilka laguna ansixiyo 120 maalmood kadib markii loo soo diray bukaanka/cidda lacagta damaanad qaaday biilkii ka bixidda isbitaalka.

Waxaa jira xaalado gaar ah oo ay waaxdu ugu gudbinayso biilka hay'adda ururinta kharashka kahor muddada 120 maalmood ah ee la soo dallacay kharashka ka bixidda:

1. Waxaa la caddeeyay u-qalanka Kaalmada Dhaqaale waxaana qofka loo sheegay inta ay kusoo urartay baaqiga laga doonayaa ama inaanu u-qalmin Kaalmada Dhaqaale laakiin ma doonayo inuu galo heshiis kharash bixin (ama uu buuxiyo ugu yaraan mid kamid ah Shuruudaha Gudbinta Kharash Qaadidda ee sare).
2. Bukaanka waxa loogu sheegay inta uu u-qalmo oo ka yar kharashka daryeelka ee laga doonayo, iyo xaqa uu u leeyahay in uu arji uu ku dalbanayo Kaalmo Dhaqaale oo dheeraad ah uu gudbiyo, laakiin kuma soo gudbin wakhtigii la siiyay.
3. Ma jiro heshiis qorshe kharash bixin oo la galay – Bukaanada/Damaanad-qaadaha diiday mid kamid ah qorshayaasha bixinta kharashka waxaa loo gudbin doonaa hay'adda ururinta kharashka marka sidii ku munaasabka ahayd loo wargeliyo.
4. Jawaab la'aan waraaqaha ama taleefanka - haddii loo arko in bukaanka ay gaadhayaan qaansheegaha oo aanu uga soo jawaabaynin isbitaalka, xisaabtiisa waxaa la wareejin karaa 90 maalmood kadib markii adeegga loo qabtay, waa haddii bukaanka wargelintii ku munaasabka ahayd ee qorshaha isbitaalkana la gaadhsiiyay.
5. Heshiiskii ayaa laga soo bixi waayay - Bukaanada bixiya lacag ka yar intii laga rabay ama ka boodsiiyey mar waxaa loo gudbin karaa hay'adda isaga oo wargelin ku filan la siiyey.
6. Bukaan lagu xukumo madmadaw - Bukaanada cinwaan khalad ah ama aan dhammaystirnayn qora waxaa isla marka la ogaado loo gudbinayaa hay'adda. Marka la caddaynayo madmadawga waa in la hubiyaa inayna ahayn khalad dhacay markii la diwaangalinayay.
7. Bukaanka aan si fiican kharashka u bixin jirin - Bukaanada lagu yaqaanay in aanu bixinin kharashka isbitaalka (tusaale ahaan, leh xisaab hay'ad kale) waxaa lagu gudbin karaa in ka yar 90 maalmood, taas oo la siiyay wargelintii ku munaasabka ahayd.
8. Dib u dhacyada bukaanka ee hore - Bukaanada ka baxa heshiis badan looma baahna in wargelin dheeraad ah kahor intaan hay'adda loo gudbin la siiyo, waa haddii mar hore lala socosiiyay in dib u dhac kale uu keeni doono u gudbin hay'adda kharash qaadidda oo bilaa ogaysiis ah.

Waxaa la hakinayaa dedejintii u diriddii hay'adda ururinta kharashka haddii shaqaalaha PFS ay u arkaan xaaladda bukaanka mid dammaanad qaadaysa tallaabadaa.

D. Tallaabooyinka Kharash Ururinta Aan Caadiga Ahayn (ECAs):

Xisaabta Bukaanka waa in aan la galinin wax ECAs ah[1], ama NWHMC ama hay'adda ururinta kharashka ee loo diray, ilaa ay yimaaddaan xaaladaha soo socdaa:

1. Waxaa la sameeyay dadaal macquul ah oo lagu ogaanayo u-qalmidda Kaalmada Dhaqaale. Waxaa kamid ah dadaalada macquulka ah kuwa soo socda[2];

[1] ECAs waxaa kamid ah u sheegista shakhsiga hay'adda amaahda, la wareegista hanti-ma-guurto ah, la wareegista xisaabaha bangiga, tallaabo sharci oo madani ah, la wareegista mushaharka iyo dalabka kharashka ama deebaajiga looga baahan yahay siinta daryeelka caafimaad ee daruuriga ahaa.

2 Isbitaalku muu samaynin dadaal macquul ah si uu u ogaado u-qalmidda bukaanka kaliya marka uu bukaanka ka helo ka dhaafis saxeexan, sidoo kale Isbitaalka looma arkayo in uu dadaalkii macquulka ahaa sameeyay haddii Isbitaalka caddeeyo in aanu u-qalmin

a. Bukaanka waxaa la siinayaa guudmar luuqad cad ku qoran oo Xeerka Kaalmada Dhaqaale ah iyo arji Kaalmada Dhaqaale ah kahor intaanu ka bixin isbitaalka waxaana laga caawinayaa in uu arjiga buuxiyo;
b. Haddii arji aan buuxin la helno, qoraal wargelin ah ee xogta/dokumentiyada maqan ayaa loo soo diri bukaanka si loogu wargeliyo wixii ECAs ah Isbitaalka (ama wakiilka Isbitaalka) ayaa bilaabi kartaa ama haddii kasii wadi kara haddii arjiga ama kharashka aan lagu helin wakhti la isla qaatay;[3]
c. Wixii qaansheeg kharash waxa la socda wargelinta cad oo la xidhiidha helitaanka Kaalmada Dhaqaale taas oo leh taleefan laga wacayo si loo helo xogta/ kaalmada iyo Websaytka toos ah taas oo nuqullo ah dokumentiyada Kaalmada Dhaqaalaha ah laga helo;
d. Wakhtiga ku munaasabka ah ayaa lagu mariyaa nidaamka arjiga la buuxiyay ee Kaalmada Dhaqaalaha bukaankana waxaa lagu wargeliyaa qoraal go'aanka, waxaa la siiyaa qaansheegta u dambaysay haddii baaqi jiray, waxaana loo celiyaa wixii lacag dheeraad ah uu bixiyey.
e. Isbitaalku waxa uu galiyay dadaalkii la rabay si uu u ogaado u-qalmidda bukaanka Kaalmada Dhaqaale ee u diyaarka ah isaga oo raacaya xogta u-qalmidda bukaanka ee hal sabab ama wax ka badan-barnaamijyada dadwaynaha ee la tijaabiyey.
f. Isbitaalku waxa uu siin karaa Kaalmo Dhaqaale bukaanka aan ku bixinin xog/dokumentiyo looga baahnaa oo dhammaystiran Arjiga Kaalmada Dhaqaalaha.

2. 120 maalmood ayaa kasoo wareegay wakhtigii lasoo saaray qaansheegta kharashka ka bixidda isbitaalka; sidoo kale

3. Shuruudaha wargelinta ee soo socda waa la buuxiyay (ugu yaraan kahor 30 maalmood bilaabista ECA):
   a. Qoraal wargelin ah ayaa la diraa kaas oo lagu wargelinayo jiritaanka Kaalmada Dhaqaale;
   b. Siinta guudmarka Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha oo luuqad waadax ah ku qoran;
   c. Wargelinta tallaabada la qaadayo haddii aan la bixin kharashka;
   d. Wargelinta taariikhda wixii ka danbeeya tallaabada la qaadayo haddii aanay nasoo gaadhin kharashku; iyo
   e. Isku-dayada la sameeyey ee in afka loogaga waramo bukaanka Xeerka Kaalmada Dhaqaale iyo arjiga Kaalmada Dhaqaale bukaanka.

4. Warbixinta amaahda ayaa iman 150 maalmood kadib qaansheegta koowaad ee kadib ka bixidda isbitaalka.

5. Baaqiga lagu dacwayn maayo qofka ilaa 240 maalmood kadib markii la soo saaray qaansheegta bixidda kadib.

6. Agaasimaha Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka/Helitaanka Bukaanka ayaa go'aansada in dadaal macquul ah la galiyay sidii loo ogaan lahaa in uu bukaanku u-qalmo Kaalmada Dhaqaalaha.

IV. XEERKA BADH KA DHAAFIDA KHARASHKA QOFKA ISKII ISKAGA BIXINAYA EE DEDEJIYA BIXINTA:

Xeerka qaadidda kharashka ee isbitaalku waxa uu caddeeyay sida soo socota si loogu oggolaado dabacsanaanta ugu badan waaxda qaansheegta ee bukaanku si ay uga wada heshiiyaan sida bukaanku wax u bixinayo loona buuxiyo baahida iyo waxa uu filanayo bukaankayagu. Badh ka dhaafidda kharashka ee hoose waxa loo dammaanad qaadayaa bukaanada dedejiya bixinta kharashka ee aan lahayn caymis ka bixiya adeegyada loo fidiyay.

Bukaanka/cidda kharashka bixinaysa ee aan lahayn caymis adeegyada loo fidiyay ka bixiya waxaa la siinayaa boqolkiiba soddon (30) boqolkiiba in laga dhaafo kharashka haddii uu ku bixiyo kharashka soddon (30) maalmood gudahood. Balse, kuma waajibto badh ka dhaafida kharashku Barnaamijka Qiimaha Isku Xidhan ee NWHMC (tusaale ahaan, adeegyada quruxda, iyo qalliinka gaarka ah), ama bukaanada/kharash-bixiyayaasha la siiyay sadaqad/kaalmada kaas oo ku salaysan xogta la aaminsan yahay inay tahay mid aan la isku hallayn karin ama aan sax ahayn ama lagu helay isaga oo bukaanka la khasbay ama loo caga jugleeyay dhaqaale.

---

[3] Wixii ECAs bilawday waa la hakiyaa.

Goobaha Helitaanka Bukaanka, oo ay kamid yihiin qolka gurmarka degdegga iyo agagaarka gelidda isbitaalka, waxay siin macluumaad kusaabsan ikhtiyaarada lacag-bixinta dhammaan bukaanada gaarka lacagta iskaga bixinaya. Waxaa kamid ah ikhtiyaaradan haddii bixinta la dedejiyo in kharashka badh la dhaafo, helitaanka Kaalmada Dhaqaale, iyo cinwaanka arjiga kaalmada Medicaid.

V. IN SI SIMAN LOOLA DHAQMO BUKAANADA/KHARASH-BIXIYAYAASHA:

Northwest Hospital and Medical Center waxa ay uga shaqeeyaan xisaabaadka bukaanka qaab waafaqsan xeerka kharash qaadidda. Xaaladdii doontaaba ha jirtaa looma eego hirgalinta xeerkan da', isir, midab, jinsi, doorashada jinsiga ama dhalashada uu kasoo jeedo qofku.

Nuqul xeerkan ah, sidoo kale nuqul Xeerka Kaalmada Dhaqaale ah, guudmarka iyo arjiga xeerka Kaalmada Dhaqaale waxaa lagu heli karaa iyada oo lagala xidhiidhayo Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka:

UW Medicine/NW Patient Financial Services 10330
Meridian Ave. N, Suite 260
Seattle, WA 98133

206/668-6440 ama ka bilaa lacagta ah ee 877/364-6440

nwhospital.org/visitorinfo/billing/asp

Dib u eegay: 10/05, 9/06, 8/07, 11/07
Dib u eegis lagu sameeyay: 6/92, 7/93, 3/96, 6/01, 9/06, 8/07, 11/07, 2/11, 3/13, 3/15, 4/16, 10/17

Masuuliyadda/Ansixinta Shaqada:
Agaasimaha, Adeegyada Kaalmada Dhaqaale, Agaasimaha Sare oo Wareegga Dhakhliga ah & Xisaabiyaha Guud Ee Kooxda Hoggaanka sare: Madaxwayne Ku Xigeen Sare ee Hawlgallada
Ee kooxda Hoggaanka Sare: Madaxwayne Ku Xigeenka Adeegyada Xarunta Caafimaadka/CNO